



## AXDIYADA JENEefa,

# TARTANKA 17-AAD EE MAQAAL DIYAARINTA GUDDIGA CAALAMIGA EE LAANQAYRTA CAS OO LOOGU TALA GALAY JAAMACADAHA BARIGA AFRIKA

### SU'AAL

Muddo 70 sano ah, Axdiyada Jeneefa ee 1949 ayaa waxay ahaayeen asaaska Xeerka Caalamiga ee Bani'aadamnimada. Xeerkani wuxuu cadeynayaa sharciyo qeexan, si loo dhowro dhibbanayaasha colaadaha hubaysan loona xadido aaladaha iyo qaababka dagaalka. Axdiyada Jeneefa waa nidaamka badbaado oo ka hortagaya falalka waxshiniimda ah. Todobaatan sano kadib, shaki kuma jiro dhaqan-gelintooda iyo ku haboonaantooda dagaalada hubeysan. Si kastaba ha ahaatee, habka dagaalada hubeysan ee casriga ah, dabeecadda dhinacyadda colaaddu ka dhaxayso iyo horumarka teknoolojiyada ayaa muhiim ka dhigeysa in tixgelin dheeraad ah la siiyo xeerka caalamiga ah bani'aadamnimada. Falanqee.

### TILMAAMAHA

- Tartanku wuxuu u furan yahay dhammaan ardayda aan weli ka qalin jebin jaamacadaha Bariga Afrika
- Curisyada waa in la qoro (la teeb gareeyo), si habbona qaabeeyo tixraacna loo sameeyo, waana la raaciyo tusmada tixraaca.
- Curisyadu waa in aysan ka badnaan 4000 oo erey (oo ay ku jiraan tusmada hoose iyadoo aysan ku jirin tusmada tixraaca)
- Curiska iyo nuqul kaarka aqoonsiga ardayga/ardayada waa in uu gaaraa Xafiis-goboleedka ICRC ee Nairobi email ahaan (sok\_com@icrc.org) 30-ka Juunyo 2019. Maqaalada xilligaa ka dameeya lama aqbalayo.
- Ardayga tartanka ku guuleysta waxaa la siin doonaa ballanqaad si uu uga qayb galo Tababarka Xeerka Caalamiga ee Bani'aadamnimada oo lagu qaban doono Nairobi, Kenya bisha Sebteembar 2019, iyo abaal marin lacageed. Waxaa sidoo kale abaalmarin heli doona ardayga labaad, kan sadexaad, iyo ardayga ugu maqaal wanaagsan dal walba.

### HABKA QIIMAYNTA

Ka qaybgalayaasha waxaa lagu qiimeyn doonaa doodahooda macquulka ah, sida qotada dheer oo ay ugu diyaariyaan jawaabahooda, qaabka iyo muujinta aqoonta ay u leeyihiin mawduuca. Mid kasta oo ka mid ah shuruudaha ayaa waxaa la siin doonaa dhibcooyinka hoos ku qoran:

Aqoonta mawduuca	Fekerka iyo fallanqaynta	Qaab-dhismeedka, tixraaca iyo caddaynta cilmi-baarista	Wadarta guud
40	30	30	100

### Wixii faahfaahin dheeraad ah fadlan la xiriir:

Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas,  
 Waaxda Warbaahinta, Ergada Soomaaliya,  
 Wadada Prof. Jimcaale, Garoowe, Soomaaliya  
 Tel: : 05844110 ama Ahmed Abdulkadir +252 615744978 & +252 907798810,  
 Email: sok\_com@icrc.org  
 www.icrc.org

# ICRC